

P2024-01 Gunaanad

Waaxda waxbarashada iyo tacliinta ee magaalada Helsinki (KASKO) waxaa guggii 2024 soo gaadhay xog-jabsasho halis ah. Natijada xog-jabsashadaasi waxaay noqotay in xog badan oo khuseysa ardayda iyo shaqaalaha ay gacanta u galeen xog-jabsadaha. Intaa waxaa dheerayd in dukumiintiyada kaydka shabakadda ay ku jireen xogta dadka kale, shirkadaha iyo dhinacyada kale ee wadashaqaynta ee si toos ah ama si dadban ula macaamila magaalada.

Xog-jabsashadu waxaay bilaabatay bartamihii bishii Abriil ee 2024, markaas kaddib ayuu bilaabay weeraruhu inuu qiimeeyo bartilmaameedyada shabakada gudaha iyo inuu balaadhiyo galitaankiisa serferada kala duwan. Dhamaadkii Abriil weeraraha ayaa ka koobiyey kaydka shabakadda afar mar oo kala duwan qiyaastii laba terabayt oo xog ah. Tirada saxda ah ee faylalka ama waxa ku jira waa la awoodi kari waayay in la ogaado. Baaritaanka waxaa lagu gaaray qiimeyn ah inuu weerarahu helay qiyaastii 750,000 oo dukumiinti ah, kuwaas oo qaar ka mid ahi ay ka koobnaayeen xog shakhsiga ah oo macluumaad aan la soo shaacbixin karin ay ku jiraan.

Xog-jabsiga ayaa sii socday muddo dheer, sababta oo ah la-socodka shabakada hay'adda ayaa ahaa mid liita wargelinada ka soo baxana waa lagu guuldareystay in wakhtigooda lagaga jawaabo. Markii la xaqiijiyey warbixinta xog-jabsiga, magaalada Helsinki ayaa isla markiiba bilowday tallaabooyinka maaraynta iyo hagaajinta, kuwaas oo lagu joojiyey weerarkii.

Koobiyeynta xogta sidaas u badan waxaa suurtageliyay laba arrin: Nidaamka xogta waxaa laga soo jabsaday adeegaha xidhiidhka fog ee VPN-ka oo si dhiman loo maareynayay, kaydka shabakaddana xog badan ayaa ku urursantay muddo dhawr sano ah. Maaraynta liidata waxay ka dhalatay isbeddelada shaqaalaha iyo hay'addaba, taas oo keentay in mas'uuliyaduhu ay noqdaan kuwo aan dadka u kala caddeyn. Faylalku waxaay ku urursameen kaydka shabakadda, sababta oo ah maaraynta xogta ayaa ahayd mid aan dhamaystirnayn lalamana socon jirin tixgalinta tilmaamaha laga bixiyay isticmaalka kaydka.

Maaraynta xogta waxaa la xiriira sharciyo iyo xeerar badan, laakiin aqoonta ay ka leeyihiin dadka hawl-wadeenada ah ayaa inta badan ah mid dhiman. Sharciga iyo tilmaamaha qaranka oo dhan ka dhaxeeya ayaa qayb ahaan ah kuwo adag in la fahmo oo kala daadsan. Gaar ahaan degaanada waxaa saaran waajibaaddo ay dejiyeen hay'ado kala duwan oo dawladeed, taas oo keenta in guud ahaan ay adag tahay in la maareeyo.

Xog-jabsiga waxaa ka dhashay in xog badan oo ku saabsan macluumaadka shakhsiyeed ay weerareha gacantiisa galeen. Xogtan waxaa macquul ah in hadhoow loo isticmaalo ujeedooyin waxyeello laga damacsanyahay, tusaale ahaan xatooyada aqoonsiga iyo khiyaano. Intii lagu jiray baaritaanka arrintaas calaamado la xidhiidha lama arkin.

Dhibbanayaasha xog-jabsigu waxay ahaayeen boqolaal kun oo qof. Baaritaanka waxaa ku soo baxday inay adagtahay in la qiimeeyo dhibbanayaasha dhamaantood. Gaaritaanka shaqaalaha hadda u shaqeeya magaalada si fiican ayaa loogu guuleystay, laakiin in si buuxda loo helo shaqaalihii iyo ardeydii hore iyo sidoo kale ardeyda hadda dhigtaaba waxaay ahayd mid aad u adag, sababtaas darteed arrintaas layskuma dayinba.

Baaritaanka waxaa lagu bixiyay afar talo. Kuwaas oo inta badan ku socda Wasaaradda maaliyadda dowladda oo mas'uul ka ah fulinta iyada oo la kaashanaysa Wasaaradda caddaaladda, Wasaaradda gaadiidka iyo isgaarsiinta, Maamulka waxbarashada iyo Iskutagga degaannada.

1. Wasaaradda maaliyadda dawladda iyada oo la kaashanaysa Wasaaradda caddaaladda waxay hubinaysaa in sharciga ku saabsan maaraynta xogta maamulka dadweynaha la isku waafajiyo iyo in qaab-dhismaha kormeerka iyo hagista la caddeeyo.
2. Wasaaradda maaliyadda dawladda iyada oo la kaashanaysa Wasaaradda Ggaadiidka iyo isgaarsiinta waxay baadhaysaa sida qaranka guud ahaan loogu horumarin karo ogaanshaha cilladaha amniga xogta ee maamulka dadweynaha waxayna hubinaysaa in hay'adaha dadweynahayu ay leeyihiin awood ku filan oo lagu ogaado laguna hagaajiyo cilladaha amniga xogta.
3. Wasaaradda maaliyadda dowladda iyada oo la kaashanaysa Maamulka waxbarashada ayaa hubinaysa in degmooyinka iyo magaalooyinku ay horumariyaan isgaarsiintooda khuseysa kiisaska xog-jabsashada oo ay isgaarsiintaasi noqoto mid ay ka soo baxaan hagitaanno faseex ah oo si fudud loo heli karo, oo taasina ay saamaxdo in dhibbaneyaashu ay iska difaacaan arrimaha ka dhalan kara xog-jabsiga oo ay ku ilaalin karaan macluumaadka aqoonsigooda.
4. Wasaaradda maaliyadda dowladda oo la kaashanaysa Iskutagga degmooyinka ayaa degmooyinka ka taageeraysa aqoonsashada iyo hagaajinta god daloolada ammaanka xogta iyo horumarinta maareynta halisyada ammaanka xogta.